DIB U QAABAYNTA:

Ka bixi ra'yi-celintaada khariidada la soo jeediyay ka hor November 15, 2022.



Guddiga Dib-u-dejinta Seattle ayaa soo jeediyay Soohdimaha Degmada ee Golaha Magaalada

King County GIS Center

1 Komishanku waxa uu sameeyay khariidad qabyo ah oo rasmi ah oo ah waxa ay noqon karaan xuduudaha Degmada Golaha Deegaanka 10 ka sano ee soo socda. Xuduudo cusub ayaa saamayn doona cida kugu matalaysa Golaha Magaalada.

2 Is barbar dhig xuduudaha jira iyo kuwa la soo jeediyay. Marka la eego Tirakoobka 2020, magaalada Seattle waxay korodhay 21.1% ilaa 2010. Iyadoo lagu salaynayo shuruudaha sharciga ah* degmo kasta waa in ay yeelato dad is leeg 1% gudahood, taas oo ah ilaa 105,288.

Degmo	Tirada dad-ka ee hada	Tirada dadka khariidadda la soo jeediyay
1	99,698	105,848
2	99,163	105,520
3	106,845	105,011
4	106,103	105,614
5	99,102	105,150
6	102,753	105,861
7	123,351	105,091

* Wax badan ka akhri dhinaca dambe

3 Guddidu waxay jeclaan lahaayeen jawaab celintaada su'aalahan:

- Aaway xaafadaadii?
- Xaafadaadu ma leedahay dhaqamo isku xidhan, sifooyin iyo calaqad?
- Ka fakar xidhiidhka xaafaddaada kala dhexeeya dawladda hoose. Soohdinta degmada wax ma ka bedeli kartaa sida aad ula shaqeyso wakiiladaada?
- Waa maxay siyaabaha isbeddelka xudduudaha degmadu faa'iido ugu yeelan karaan xaafaddaada?

Isticmaal summadan QR si aad noogu soo dirto jawaab celintaada.

4 Baro wax badan oo ku saabsan Habka Dib-u-dejinta:

- Seattle.gov/redistricting
- Su'aalaha: iimaylka elsa.batres-boni@seattle.gov

Seattle



Xuduudaha Degmada ee Golaha Magaalada Seattle ee hada jira

King County GIS Center

*XEERARKA DIB U QAABAYNTA **:*

- Degmooyinku waa in ay is leeg yihiin dad ahaan intii suurtagal ah; dadweynaha degmada ugu weyn waa in aanay dhaafin dadweynaha degmada ugu yar in ka badan boqolkiiba hal [dadweynaha degmada ugu yar]. Taas macneheedu waxa weeye in dadka degmada ugu badani aanay ka badnayn 101% dadweynaha degmada ugu yar.
- Xuduudaha waa in loo sameeyaa si looga dhigo degmooyinka sida ugu macquulsan kuwo isku xiran juqraafi ahaan.
- Degmooyinku waa in aan la xeerin, xogta dadweynahana looma isticmaali karo ujeeddooyin loogu xaglinayo ama lagu diido koox isir ama xisbi siyaasadeed.
- Soohdimaha cusub ee Golaha deegaanka Magaalada ma aha in lagu saleeyo halka uu qofna deggan yahay. Marka la sawirayo khariidaddooda, Guddiga iyo la-taliyayaasha GIS ma tixgelin doonaan goobta qofna degan yahay.
- Ilaa xad la taaban karo, xuduudaha cusub waa in ay raacaan xuduudaha degmada ee jira.
- Ilaa inta suurtogalka ah, xuduudaha cusub waa inay raacaan marin-biyoodka la aqoonsan yahay iyo xuduudaha juqraafiga.
- Ilaa inta suurtogalka ah, xuduudaha cusub waa in ay dhawraan bulshooyinka Seattle iyo xaafadaha.

**Qayb-hoosaadka Axdiga Magaalada D. DIB U DAJINTA GOLAHA (3) iyo RCW 29A.76.010(4)

SEATTLE REDISTRICTING 2021-2023